

## CAYAARAHA & JIRDHISKA

Waxaan bixinaa cayaaro kala duwan iyo waxqabadyo sannadka oo dhan da' kasta iyo karaan kasta. Waxaa tusaale ka ah barnaamijyadaan bixino:

### CAYAARAHA DHALINYARADA IYO DA'YARTA

- Kubadda Kolayga
- Kubadda-cagta ee La istaabto "Flag Football"
- Orodada iyo Bootinta
- Kubadda-shabaqa ee h=Hablaha
- Kubadda cagta

### CASHARADA CAYAARAHA EE DA'YARTA

- Kubadda Teniska Dheer
- Kubadda Cagta ee Gudaha "Indoor Nerf Soccer"
- Casharada Cayaaraha
- T-ball

### CASHARADA DADKA WAAWEYN & KOOXAHA

- Kooxaha Kubadda Laadka "Kickball Leagues"
- Kubadda-cagta ee La istaabto "Flag Football"
- Jirdhiska Lagu Madadaasho, NIA, Yoga, Yogalates
- Kubadda Teniska Dheer
- Plyometrics (Jirdhiska Degdegga ah)
- Kubadda Cagta
- Kubadda Kolayga

**HADDII CIYAARTA AAD UGU JECESHAHAY AANAY HALKAN KU QORNAYN, FADLAN NA OGEYSII. WAXAANU HAD IYO JEER RAADINAYAA FIKRADAHA**

# BARNAAMIJAYNTA MADADAALADA

Xarunta Bulshada ee High Point waxay siisaa casharo, waxqabadyo iyo xaflado gaar ah dhamaan bulshada da' kasta, awood kasta ama dhaqaale kasta ha yeesheene.

### WAXQABADYADA QOYSKA

Waxaanu u qabanaa dhamaan qoyska xaflado si joogto ah. Xaflasaha madadaalada ee aanu hore u bixinay waxa ka mid ah bandhigyo sixirlow, the Roving Reptile Man, iyo Mad Science.

### XAFLADAHGA GAARKA AH

Ugu dabaaldeg xaflado kala duwan iyo fasaxyo sannadka oo dhan oo ay ku jiraan:

- Raadinta Ukunta ee Dayrta "Spring Egg Hunt"
- Habeenka Dibed-baxa Qaranka "National Night Out"
- Xaflada "Freaky Fall Festival"
- Cashada "Thanksgiving Dinner"
- Cunto-wadaaga Bulshada "Community Holiday Potluck"

### DHALAANKA

La soco barnaamijyadayada joogtada ah ee dhalaanka lagu reebo oo ay ku jirto garoonka ciyaaraha ee gudaha. Waxa kale oo aanu bixinaa casharo kala duwan, xaflado gaar ah iyo kaamam.

### DHALINYARADA

Waxaanu bixinaa casharo dhawr ah oo ay ka mid yihiin muusiga, ciyaaraha, qaababka fasaxyada, farshaxanka iyo farsamaynta iyo in badan oo kale.

### DA'YARTA

Xarunta Da'yarta waa meel madadaalo oo lagu citaaro buul, daawado TV, sameeyo shaqada guriga, lagu barto wax-karinta, loobaxo dibedda, oo laga helo adeega barashada Fursadaha! Barnaamijyada habeenkii xilliga danbe waxa la bixiyaa toddobaadkii.

### DADKA WAAWEYN

Ma nihin keliya meel caruureed. Ku soo biir dadka waaweyn barnaamijyo xiiso iyo aqoon leh. Saxiix maalin keliya, toddobaad, ama cashar toddobaad ah oo naftaada ah. Waxaan bixinaa waxqabadyo kala duwan, min casharada biyaanaha ilaa Yoga. Cirku ayaa inoo xad ah!

### DADKA 50 JIR IYO WIXII KA WEYN

Waxaan lamaano la nahay shaqaalaha Life Long Recreation si aan u bixino safarada maalinlaha ee caadiga ah, barnaamijyada fayoaqabka, kilaabyada, iyo waxqabadyada.

### DADWEYNAHA GAARKA AH

Xafiiska Barnaamijyada La-gaareeyey wuxu bixiyaa barnaamijyo iyo xaflado gaar ah oo ku salaysan afartii-bilood Galbeedka Seattle. Haddii aad hayso su'aalo la xidhiidha ka-qaybgalka fadlan wac 206-684-4950.

## DARYEELKA DA'DA DUGSIGA

Barnaamijyada kahor iyo kadib dugsigu waxa lagu bixiyaa daryeel u fiican ilmaha oo ku haboon waalidka shaqeyda ee leh da'da fasalada K ila 5. Kaamamka gu'ga ka sokow, waxaan qabnaa daryeelka baahiyaha ilmaha dugisga taga.

Isaga oo ka mid ikhtiyaarada xanaanada ilmaha ee ugu jaban Galbeedka Seattle, High Point CC wuxu sii buuxda uga sajjilan yahay DSHS, taas oo ka dhigan wakhtiga ugu tayo roon ee looga maqnaan karo dugsigu ama guriga ee ilmahaaga. Xubnaha Shaqaalaha ayaa aad uga shaqeyda siday u bixin lahaayeen fursadaha doorashada iyo hagitaanka qofka iyada oo la dhiirigelinayo ilmo kasta gaar ahantiisa iyo xirfadiisa.

Ujrada barnaamijka waxay si siman ugu fidsan yihiin dhamaan 10 ka billod (178 maalmood) ee sannad dugsiyeedka. Waxa jira ujrado dheeraad ah maalmaha aan dugsi jirin iyo fasaxyada toddobadka ah. Shaqaalaha barnaamijku waxay bixiyaan cunto fudud subaxii iyo galabtii.

Deeq-waxbarasho oo gaadhaya ilaa 90% ayey heli karaan qoysaska u qalmaa oo waxaanu aqbalnaa lacagta daryeelka ilmaha ee DSHS.

**WAXAA LOO BAAHAN YAHAY TABABARAYAAL:** Miyaad leedahay xirfad gaar ah ama xiiso aad rabto inaad la wadaagto dadka kale? Waxaanu mar kasta raadinaa fikradaha casharo cusub. Wac 206-684-7422.

## ARAGTIDA JARDIINOYINKA IYO MADADAALADA SEATTLE:

Waxaan ka abuurnaa bulsho dadka, jardiinooyinka, iyo barnaamijyada.

## JARDIINOYINKA IYO MADADAALADA SEATTLE IYO ARC OO ADIGA KUU WADASHAQAYNAYA ADIGA!

Mid ka mid ah lamaanaha ugu xooga badan ee Jardiinooyinka iyo Madadaalada Seattle waa Associated Recreation Council (ARC). ARC waa urur samofal oo u go'ay taageerada madadaalada Seattle iyaga oo siiya barnaamijyo iyo adeegyo bulshadeena oo kala taliya Jardiinooyinka barnaamijyada, adeegyada, xarumaha iyo hawlaha.

## MACLUUMAADKA GUDDIGA TALOBIXINTA

Guddi kasta oo talobixineed waxay ka kooban tahay muwaadiniin tabarucayaal ah oo uu magacaabay Isduwaha Jardiinooyinka iyo Madadaaladu iyo, la shaqaynta shaqaalaha Jardiinooyinka, samaynta soo jeedimo noocyada barnaamijyada iyo waxqabadyada la siinayo xarun bulsho ama dad gaar ah.

ARC waxay bixisa xisabtan maaliyadeed, waxay taageertaa guddiyada talobixinta, hogaanka ku salaysan bulshada, waxbarashada, iyo jihada siyaasada.

Adiguna sidoo kale waxaad samayn kartaa isbedel markaad ku biirto Guddiga Talobixinta ee mid ka mid ah fadhidadooda bishii.

## UJEEDDADA GUDDIGA TALOBIXINTA EE HIGH POINT:

- Isku xidhka bulshada iyada oo bixinaysa adeeg sare oo loogu talagalay macaamiisha, kobcinta tayada nolasha, iyo gargaarka qofka inuu rummeyo karaankiisa buuxa.
- Jabinta caqabadaha, hubinta sinaanta, ka-qayb-gelinta, iyo helitaan suuragal ah.
- Bixinta fursado iska-jawaabaya oo masuuliyad xanbaarsan oo kobcinaya ciyaar caafimaad oo jirdhiska, abuuritaanka barasho, iyo helitaanka garashada madaniga.

# BARNAAMIJYADA MADADAALADA EE HIGH POINT!

- Barnaamijyada Dhalaanka, Dhalinta, Da'yarta, Dadka Waaweyn iyo Waayeelka
- Daryeelka Dugsiga Kahor iyo Kadib
- Kaamamka Gugii ee Maalintii "Summer Day Camps"
- Jiimka Gudaha ee Dhalaanka "Toddler Indoor Play Gym"
- Casharada Da'da Dugsiga Kahor
- Casharada Qoobka-ciyaarka
- Kooxaha Ciyaaraha
- Barnaamijyada Qoysaska
- Xaflado Gaar ah
- Ku Reebitaan Kubadda kolayga iyo Kubadda Shabaqa
- Teniska Yar "Ping Pong"

## Gudaha ka fiiri waxqabadyo dheeraad ah!

## TAAGEERADA LACAGEED EE LA HELI KARO

Jardiinooyinka iyo Madadaalada Seattle iyo ARC waxay bixiyaan deeq-waxbarasho oo laga taageero kharashka barnaamijyada.

Deeq-waxbarasho oo gaadhaya ilaa 90% ayaa loo heli karaa barnaamijyada daryeelka ilmaha. Deeq-waxbarasho oo gaadhaya ilaa 80% ayaa iyana loo heli karaa barnaamijyada kale ee madadaalada. Codsii ayaa loo baahan yahay.

Waxaan aqbalnaa taageerada DSHS oo aanu ka sajlannahay DSHS xarun daryeel ilmo.

## KHAYRAADKA KALE

Haddii aad raadinayso adeeg aanaan bixin, ha ka waaban inaad na warsato khayraadka kale ee jira xaafadda. Waxa laga yaabaa inaan kugu xidhno wakaalad kale oo aan lamaano nahay.

## KIRADA

Xarunta Bulshada High Point waxay bixisaa qolal iyo arrimo tayo sare leh baahiyahaaga shirarka iyo xafladaha.

## MEELO BANAAN AYAA LA HELI KALAA OO AY KA MID YIHIIN:

### Qolka Ujeedada-Badan

-184 qof ayuu qaadaa

### Gymnasium

-376 qof ayuu qaadaa

### Qolalka Shirarka

-Ku filan kooxo ka kooban min 10 ilaa 184

### Jikada Heerka Ganacsi Ah ee Dhamaystiran

## WAXYAABAHA KALE EE LA HELI KARO:

### Kuraas & Miisas

- ku filan 200 oo marti ah

### Shaahshada Aflaamta "Projector screens"

### Makarafoono iyo Manbar

### Qalabka Dhibcaha iyo waqtiga

-loo adeegsado jiimka

### Waxyaabaha Caruurto Ku ciyaarto xafladaha

-waxaa lagu heli karaa ujro dheeraad ah

Isbeddelka sannadka ee ujrada ijaarka iyo shaqaalaha awgeed, halkan kumaanu soo daabicin. Fadlan na warso qiimaha kharashka xafladaada.

Waxaan dhawraynaa in aan ku gargaarno xafladaada gaarka ah ee danbe.

Nala soo xidhiidh maanta!

# Xarunta Bulshada ee High Point



6920 34TH AVE SW  
SEATTLE, WA 98126  
(206) 684-7422  
(206) 684-7402 (FAX)



Abuuritaanka Bulsho ka  
Kooban Dad, Jardiinooyin  
iyo Barnaamijyo.